

# Macluumaadka Buug-yaraha ee Xareenta Cabashada

Waligaa ma noqotay dhibane dembi? Ma doonaysaa in aad cabasho xareysato? Si kiiska si hufan wax looga qabto, booliisku wuxuu u baahan yahay macluumaad sax ah. Fadlan si taxadar leh u akhri buug-yarahan si aad u xaqiijiso inaad si fiican u diyaargarowday.

## Tallaabooyinka ugu horeeya

- Xifdi iyo islamarkiiba hoos ku qoro tilmaanta qofka dambiilaha
- Haddii bangigaaga iyo/ama kaarkaaga deenta la xado, waa in aad la xidhiidhaa hay'adaha soosaaraan si aad u baajiso
- Haddii telefoonkaada mobilka ah la xaday, waa in aad kasoo xirtaa SIM kaarka meesha lagaa soo siiyey
- Diyaarso liis faahfaahsan oo ku saabsan alaabta la qaaday ama la waxyeeleeyay
- Haddii aad marin u leedahay sawirada ilaalinta ee muuqaalka ah, ku keydi aalad
- Haddii meesha uu falku ka dhacay ay leedahay kamarado ilaalineed oo muuqaal ah oo aadan marin u heli karin, u sheeg booliiska sida ugu dhakhsaha badan

## Macluumaadka muuqaal ahaanta ah

### Halkee ayaad ka gudbin kartaa cabashada dembiilaha?

**Haddii dembiilaha aan la garanayn**, onlayn ahaan ku soo gudbi wakhti kasta dembiyada soo socda: xatooyada yar, baaskiil xadista ama waxyeelo u geysashada hanti. Tag cinwaanka dhabarka ku yaal si aad ula socoto habraaca. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan la xiriir saldhigga booliiskaaga.

Dhamaan dembiyada, saldhig kasta oo booliiska oo ku yaala gudaha Switzerland; Dembiyada Lausanne waxaa lagu soo dacweyn karaa saldhigga booliiska ee Flon.

### Ilaa intee ayay qaadan kartaa si loo qoro cabashada dembiilaha?

Waxaa laga yaabaa inaad sugto haddii dad kale ay kaa hor yimaadeen miiska. Guddaha Lausanne, waxaad ka fogaan kartaa suurto galnimada sugitaanka adigoo markaa ballan taleefoon ka qabsanaya. Iyadoo ku xiran nooca dembiga, waa inaad ogolaataa nus saac ilaa saddex saacadood si aad u diiwaan gashato cabasho.

### Immisa ayeey ku kaceysaa in cabasho la xareeyo?

Habku waa mid bilaash ah. Si kastaba ha ahaatee, khidmad maamul ayaa suurtagal ah in bixiyo haddii dokumentiyada aqoonsiga la lumiyo ama la xado.

### Yaa gudbin karaa cabashada dembiilaha?

Qof kasta oo jira 18 ama ka weyn. Si kastaba ha ahaatee, da'ayarta da'doodu ka weyn tahay 12 sano waxay xaq u leeyihiin inay soo wariyaan dembiga laga galo iyaga haddii ay awood sharci u leeyihiin.

### Waa gormaa dhammaadka waqtiga ee xareynta cabashada?

Cabashada waa in la xareeyaa saddex bilood gudahood ka dib markii la ogaado cida uu dembiiluhu yahay.

### Ma la diidi karaa diiwaangelinta cabasho?

Maya, haddii aysan ka ahan in xaqiiqooyinka la soo wariyay aanay noqon fal dembiyeed (sida waxyeello aan kama ahayn oo gaadha gaari ama muran madani ah).

## Macluumaadka loo baahan yahay si cabasho loo xareeyo

- Faahfaahintaada shakhsi ahaaneed, haddii ay suurogal tahay adoo soo bandhigaya dukumeeti aqoonsi (magaca qoyska, magaca hore, taariikhda dhalashada, meesha aad ka soo jeedo, xirfadda, cinwaanka guriga, lambarada telefoonada iyo iimaylka)
- Magaca caymiyaha taasoo dabooli doonta sheegashada/dalabka
- Taariikhda iyo waqtiga denbiga
- Meesha dhabta ah
- Nooca burburka (oo Sawir leh, qiyaasta iyo qaansheegyada haddii ay suurtoagal tahay
- Sharaxaada faahfaahsan ee alaabaha la qaatay, qaasatan:
  - telefoonada mobilka (summada, moodheelka, siriyal lambarka, baaq-sireedka sirta IMEI-ka)
  - dukumentiyadada aqoonsiga (lambarka iyo taariikhda iyo meesha laga soosaaray)
  - bangiga iyo/ama kaarkararka deenta (lambarka, hay'ada soo saarta iyo bayaan haddii si khiyaameysan loo isticmaalay)
  - Alaabaha qurxinta (sharaxaadooda ama sawirahooda iyo qiimaha)
- Fal denbiyeedyada la xidhiidha internetka (denbiyada internetka) fadlan xafid dhammaan xogta (sawirada, fariimaha isdaba yaala, iwm.)

## Maxaa kale oo aan u baahanahay inaan ogaado?

### Maxaa ku dhacaya cabashada dembiilaha?

Laba koobi ayaa waxaa loo dirayaa qofka laga cabanayo oo lasocota aqbaar ogeysiis.

Dukumeentiga asalka ayaa waxaa loo dirayaa Waaxda Dembi-baarista, haddii dembiga lagu galay Lausanne oo uu ku jiro xukunkeeda.

Kiisaska kale oo dhan, cawashada dembiilaha waxaa loo dirayaa waaxda booliiska.

Dacwooduhu/Cabashooduhu waa inuu markaa:

- La socodsiiyaa shirkadooda caymiska una diraa nuqulka ka mid ah cabashada
- Isla markiiba wargaliyaa booliiska haddii ay xasuustaan wax ay horey u hilmaameen ama markii dambe loo sheegay

### Saldhiga booliiska ee Flon

Rue de Genève 4

1003 Lausanne

Saacadaha furitaanka:

[www.lausanne.ch/police-contacts](http://www.lausanne.ch/police-contacts)

### Ballan ka qabso

+41 21 315 15 15

**Cabasho u xaree si onlayn ah  
addoo adeegsanaya**

[www.lausanne.ch/police-eplaine](http://www.lausanne.ch/police-eplaine)